



Qoysaska Dugsiyada Sarre PPS ee Qaaliga ah,

Shalayto, Caafimaadka Degmada Multnomah waxay ku dhawaaqeen tilmaamo cusub oo la raacayo kuna saabsan Af-Daboolka (face-masking): *Waa in Afka La Daboolaa marka aad gudaha dhisme ku jirto oo ay kula joogaan dadka aan kula nooleyn dhismaha, haddii dadkaasi ay tallaal qaateen iyo haddiiba ayna tallaal qaadan labadaba.* Tilmaamahani cusubi waxay jawaab u yihiin korodhka ka soo kordhay dadka qaba xanuunka fayriiska noociisa la yiraa Delta ee Oregon, taasi oo la jaanqaadeysa tilmaamaha ay bixinayaan gobolka iyo hay'adaha caafimaadka qaranku; oo ay ka mid tahay Hay'adda Xakameynta Cuduradda Faafa (CDC), iyada oo hay'adu maanta ku tallo-bixisay in dadka tallaalan ee ku nool meelaha cudurku aadka ugu faafay ay afka daboolaan marka ay joogaan gudaha dhismayaasha meelaha dadweynuhu ay ku kulmaan, iyo in loo baahan yahay in dhammaan iskuulada K-12 iyaguna afka ay xirtaan.

Haddaba iyada oo la hirgalinayo dhaqankeenii ahaa inaynu raacno tilmaamaha iyo tusaalayaashii ay bixinaysay hay'adda caafimaad dadweynaha intii xanuunka COVID-19 ina haleelay, laga bilaabo maanta waxaa looga baahan yahay dhamaan ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) iyo shaqaalaha **barmaajiyada xaggaaga ee dugsiyada sarre** inay xirtaan afka iyo sanku marka ay joogaan gudaha dhismayaasha. Shuruudani hore waxaa loogu xiray inay raacaan ardayda heerka K-8 ee qaadanaya barnaamijyada xaggaaga.

Waxaan idiinka mahadcelineynaa fahamkiina iyo wada shaqeyntiina kuwaasi oo ku aadan dadaalayada aan ku xaqiijinayno nabadgelyada iyo caafimaadka ardaydeena iyo shaqaaleena.

Shawn Bird, Ed. D.

Ku-xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada